

Title I ka Qaybgalka Waalidka

Gudiga waxaa ka go'an inuu bixiyo kaalmaynta loo baahanyahay si waalidku uu si wax ku ool ah uga qaybqaato barnaamijyada Title I Schools. Masuulka ama qof loo xilsaaray ayaa Title I Schools ku hagaya sidii looga soo bixi lahaa shuruudaha Qatbta 1118(b)- (h) ee Sharciga Hal Cunug Lagama Tagayo (No Child Left Behind) oo lagu qoray dokumentigaan.

Sharciga Ka qaybqaadashada waalidka ee Iskuulka Qaybta 1118 (b)

- Waalidku way ka qayb qaadan doonaan dib u fiirinta dokumentigaan wayna dhiibanayaan taladooda.
- Waalidka waa lala socodsiiyaa dokumentigaan, hadii la samayn karana waxaa loogu soo gudbinayaa luqad ay fahmi karaan.

Ka qaybqaadashada Sharciyada Qaybta 1118 (c)

Masuulka ama qof loo xilsaaray ayaa:

- Isugu yeeraya shir iskuulka oo sanadle ah:
 - siinayaa Title I schools warbixin iyo qalab
 - ka warbixinayaa barnaamijka xaafada ee Title I
 - ka war bixinayaa xaalada guud ee sharciyada iyo meelmarinta Title I
 - qaybinaya figradaha laga keenay waalidka (c(1);c(4)A).
- Bixinaya shirar la qabto laguna qabto meelo macquul ah, iyo markay suurogal tahay inay waalidka lagu kaalmeeyo gaadiid, caruurto loo hayo iyo shaqooyinka kale oo la xariira sida turjumaada iyo fasirka (c(2)).
- Qabanaya, waalidkoo ka qayb qaadanaya qiimeyn sanadle ah oo ku aadan waxa la barto, iyo habsanaanta sharciyada iyo meel marka si loo horumariyo qiimaha waxbarashada Title I schools (c(3)).
 - In la istcimaalo waxyaabaha kasoo baxa dib u fiirinta sanadka si loo horumariyo barnamijka ka qaybqaadashada waalidka iyo hadii ay muhiim tahay in dib loo eego sharciyada iyo meelmarka la xiriira ka qaybqaadashada waalidka.
 - Isticmaalka waxyaabaha kasoo baxa dib ufiirinta sanadka si loo ogaado waxyaabaha waalidka ka celinaya inay si weyn uga qayb qaataan, iyo in la sameeyo hab ay waalidku si badan uga qaybqaadan karaan.
- Si loo horumariyo, loona sameeyo hab, isla markaana sanad walba dib loo fiiriyo barnamij ay waalidku uga qayb gali karaan kuna tiirsan barnaamijyada u yaal

qorshaha u dhaaytiran iskuulka ee Title I, iyo waxyaabaha la iska rabo ee Title III (c(3); c(5)).

- Si loo hubiyo ku luglahaanshaha waalidka xaga dejinta, meelmarinta iyo qiimeynta barnaamijka iskuulka dhan ee sharciyada iyo meel marintooda hoos imaata qaybta 1112 (c(3)).
- La xiriirida waalidka taaso khuseysa ardaydooda ayna kamid tahay horumarka ardayga, waxbarashada, qiimeynta iyo shaqaalaha (c(4)B; d(2)A-C).
- Hadii waalidiintu ay codsadaan, in la diyaariyo shirar joogta ah oo ku saabsan waxbarashada caruurtooda (c(4)C).

Qaybsiga Masuuliyada Waxbarashada Heerka Sare ee Ardayga Qaybta 1118 (d)

Masuulka iskuulka ama qofka loo xilsaaray wuxuu:

- Harumarinayaa, ayadoo ay waalidku ka qaybqaadanayan sidii ay iskuulka iyo waalidku iskugu xirnana lahaayeen (d(1)).

Dhisida Ka Qaybqaadashada Buuxda Qaybta 1118 (e)

Maamulaha iskoolka ama qofka loo xilsaaray wuxuu:

- Qorshayn doonaa qabana doonaa barnaamijka ku luglahaanshaha waalidka (e).
- La shaqayn iyo la dhaqan ku samayn doonaa habsami u socodka ku luglahaansha waalidka ee barnaamijka ku luglahaansha ee waalidka oo hoos yimaada, Dagmaada, gobolka, dolada dhexe iyo barnamijyada bulshada (e(1)-(4)).
- In uu siiyo tababar iyo taageero Title I Schools, oo ay ka mid yihiin waalidka si loo qorsheeyo barnaamijka ku luglahaansha ee waalidka iyo siinta waxyaabo la xiriira barnaamijka iskuulka ee Title I iyo wax yaabaha looga baahan yahay Title (e(3); e(12)).
- In uu siiyo wada shaqayn, kaalmo dhinaca farsamada, iyo caawimaadaha kale ee muhiimka u ah qorshaynta ka qayb qaadashada waxqabadka ku luglahaanshaha waalidka si kor loogu qaado horumarka ardayga iyo waxqabadka iskoolka (e(11)).
- In la qabto kulamo iska socda oo lala qaato gudiga matala oo ay ka mid yihiin District Parent Action Team (D-PAT) oo uu weheliyo gudiga talada waalidka ee English language learner (ELL), Boise Parents of English Learners (BPEL). Ujeedada gudiga waa in la qaybsado fikirka, la sameeyo cilmi baaris, in lagu daro waalidka in ay go'aamo ka gaari karaan barnamijyada dagmada iyo in la siiyo hogaamin iyo faaiidooyin Title I schools (e(12)).

U furnaanshaha Qaybta 1118 (f)

- In uu siiyo fursado ay uga qayb qaataan waalidka, oo ay ka mid yihiin waalidka dhaqaalaha yar; naafada ah; aan Ingiriis si fiican u aqoon, ama wax barashadiisu yartahay; ama ka soo jeeda jinsiyad ama sinjiyad laga tirada badan.